U Diyaargarowga Dugsiga



"Sidee caruurta loogu diyaarin karaa dugsiga xanaanada?"

Waa Tilmaan loogu talagalay waalidka iyo xubnaha qoyska carruurta ka yar shan jir, Daryeel fidiyeyaasha, Macallimiinta carruurta yar-yar, Macallimiinta dugsiga xanaanada, Bulshada, Dugsiyada iyo qof kasta oo ka qayb qaata carruurta noloshooda.

U Diyaargaroobidda Dugsiga

Maxay carruurtu u baahan yihiin si ay ugu diyaar-garoobaan dugsiga xanaanada?

Maxay dugsiyadu u baahan yihiin si ay ugu diyaargaroobaan carruurta dhigan doonta?

Ujeeddada buuggan warbixineed waxay ka soo if baxday wada hadallo dhex maray 41 bulshadood ayna ka qayb qaateen waalidiin 300 kor u dhaafaya, macallimiinta carruurta yar-yar, macallimiinta dugsiga xanaanada, maamulayaal dugsi iyo xubno bulshaweynta ka tirsan. Waxay wada hadalladu ku dhaceen toddoba luqadood oo kala ah Af Ingiriisiga, Kaamboodiyaanka, Oromada, Ruushka, Soomaali, Isbaanish iyo Fiyeetnaamiis. Waxaa lagu qabtay 17 ka mid ah 19ka degmooyinka dugsiyada ee maamul deegaanka King (King County).

Qoraayeyaasha: Horseed – Debra Sullivan (Praxis Institute for Early Childhood Education) and Cheri Stefani (Puget Sound Educational Service District); Xubnaha – Susan Barkan (Public Health – Seattle and King County), Ellen Broeske (Puget Sound Educational Service District), Rujuta Gaonkar (Public Health – Seattle and King County), Bea Kelleigh (Project Lift-Off), Diane Kroll (Puget Sound Educational Service District), Deborah Lee (City of Seattle – ECEAP), Gail Tanaka (Comprehensive Health Education Foundation), Laura Wells (Child Care Resources); Tifaftiraha Sawirka – Rhonda Peterson (Project Lift-Off)

Guddiga Tifaftireyaasha: Linda Averill (Shoreline Schools), Bridgett Chandler (Talaris Research Institute), Teri Clifford (Puget Sound Educational Service District), Tom Drummond (North Seattle Community College), Julie Ezenwoye (early childhood educator), Karen Forys (North Shore School District), John Gottman (professor emeritus, University of Washington), Maryann Johnston (Early Childhood Education consultant), Garrison Kurtz (Foundation for Early Learning), Wei Li-Chen (Asian/Pacific Islander Child Care Task Force), Theresa Lourde (parent facilitator for community conversations), Kris Lowe (Child Care Resources), MAK Mitchell (Seattle Public Schools), Carol Mizoguchi (parent facilitator for community conversations), John Nimmo (Pacific Oaks College Northwest), Sally Porter (King County Library System), Wendy Roedell (Puget Sound Educational Service District), Sue Schmitt (Seattle University), Jill Sells (American Academy of Pediatrics), Michael Silver (Tukwila School District), Debra Williams-Appleton (Office of the Superintendent of Public Instruction), Ed Yonamine (Washington State Department of Community, Trade and Economic Development)

2008. Fasax ogolaasho ee dibu daabicidda warbixintan. Waxaa qiime gaar ah ku muteystay: Mashruuca U Diyaargarowga Dugsiga (Seattle/King County, Washington).

If children could tell us, here's what they might say:



"Carruurtu waxay u baahan yihiin dad waaweyn ka taageera u diyaargarowga dugsiga."

Sideed haatan u taageertaa?
Akhriyoo eeg waxa kale ee aad qaban karto!

Xirfadaha Shucuurta iyo Bulsho la Dhaqanka

Carruurtu waxay u baahan yihiin in ay dareemaan farxad iyo rayn-rayn marka ay billaabayaan dugsiga xanaanada.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Carruurtaada u sheegtaa in aad ku faraxsan tahay inay billaabaan dugsiga xanaanada. (Fadlana xus: Halka buuggan warbixineed laga leeyahay "carruurtaada" ee laga wadaa carruurta aad dhashay amaba carruurta aad mas'uulka ka tahay ama kuwa aad wax bartaa.)
- Fursad siisaa carruurta inay dugsiga soo booqdaan ka hor inta ayan billaabin.
- Dhageyso firkradaha carruurta ay ka qabaan dugsiga.
- Inta aaney dugsiga billaabin, adiga iyo carruurta wada matashaan sida inay dugsiga dhigtaan.

Carruurtu waxay u baahan yihiin inay sii ogaadaan waxa uu yahay dugsiga xanaanada.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Carruurtaada tusaalooyin ka siisaa sida amarka loo fuliyo.
- Ka caawisaa carruurtaada barashada wax la qaybsiga carruurta kale, saf istaagidda, sugidda toogtiisa, iyo wada fadhiga hareersan.

Carruurtu waxay u baahan yihiin in ay aragti fiican iska qabaan.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Tixgelisaa oo dhageysataa fikradaha carruurtaada.
- Ka kaalmeysaa carruurtaada in ay dareen fiican ka qabaan waxyaabaha ay qaban karaan.
- Ku ammaaantaa carruurtaada waxyaabaha ay ku fiican yahay.
- Sabartaa oo u fasaxdaa carruurtaada inay intii karaankooda kobcaan.
- Bartaa carruurtaada in dareemadooda oo idil ay hagaagsan yihiin, balse ficilladooda aanney mar walba saxsanayn. Tusaale ahaan, ma xumo in la murugoodo, balse ma toosna in cid kale wax lagu dhufto.
- Bartaa carruurtaada sida ay isu dejin lahaayeen marka ay caroodaan.



Carruurtu waa in ay bartaan sida dadka loo afgarto.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Tusisaa carruurtaada sida ay saaxibo cusub u samaysan lahaayeen.
- Ka kaalmeysaa carruurtaada inay fahmaan siday saaxib ula noqon lahaayen carruur ayaga ka duwan.
- Bartaa carruurtada waxa ay samayn lahaayeen marka dareenkooda wax loo dhimo.

Carruurta waa inay bartaan sida dadka loola hadlo, loona dhageysto.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Kala hadashaa carruurtada waxyaabaha ay ahmidyad siinayaan.
- Bartaa carruurtaada marka ay tahay inay hadlaan iyo marka ay tahay inay wax dhageystaan.
- Bartaa carruurtaada xuruufta tilmaamaya dareenkooda iyo baahidooda, iyo marka ay tahay inay xuruuftaas isticmaalaan.

Sida Carruurta ay wax u Bartaan

Carruurta waa inay ku farxaan waxbarashada.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Ku dhiirigelisaa carruurtaada inay baadigoobaan dareenka – aragga, taabashada, urinta, maqalka iyo dhadhanka.
- Siisaa carruurta waqti fiican iyo xulashooyoon xiiso leh.
- Siisaa carruurta waqti badan ay wax ku kala gartaan.

Carruurtu waxay u baahan yihiin inay isku taxluujiyaan xittaa haddii ay ku adag tahay.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- U fasaxdaa carruurta ciyaaro ay markaa xiisaynayaan.
- Ku kaalmaaysaa carrurta inay sahmiyaan iskuna dayaan hawlo cusub.
- Ku kaalmee carruurta inay tallaabo-tallabo ay wax ku bartaan.
- Bartaa carruurta in gafku uu ka mid yahay barashada.
- Tustaa carruurta siyaalo kala duwan ay ku fahmaan dunida ay ku nool yihiin.

Carrurtu waxay u baahan yihiin siyaalo kala duwan ay dareenkooda uga hadlaan.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Ku kaalmeysaa carruurta ciyaaraha, heesaha, foorida, ciyaarta qalabka miyuusikada, gacan wax ku sawirka iyo dhismooyinka, alifaadda iyo sheekooyinka been abuurka ah.
- Ku kaalmeysaa in ay u daneeyaan una gargaaraan dadka kale.
- Ku kaalmeysaa carruurtaada inay wax ka bartaan ubaxa, dhirta, xoolaha, daruurta, cirka iyo biyaha.



Carruurtu waxay u baahan yihiin inay dareen fiican ka qabaan qoyskooda iyo dhaqankooda, isla markaanna ay fahmaan dhaqannada kale.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Tusisaa carruurta buugagga iyo sawirrada dad iyaga iyo reerkooda u eg.
- Tusisaa carruurta buugagga iyo sawirrada dad dhaqannadooda ka duwan.
- La heystaa heellooyinka una sheegtaa sheekooyinka dhaqankooda iyo kuwa dhaqannada kale.
- Isticmaashaa luqadda ay carruurta fahmayaan kana kaalmeynaysa fahamka iyo wax barashada.
- Geysaa carruurta meelaha ay ka baran karaan dhaqankooda iyo dhaqannada kale.

Adeegsiga Xuruufta iyo Lambarrada

Carruurta waxay u baahan yihiin inay wax ka bartaan xuruufta iyo buugagga.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Bartaa carruurtaa xuruuf cusub.
- Ku bartaa carruurta xuruuf iyo tilmaamo luqaddooda iyo dhawaaqa ay xuruuftaa iyo tilmaamadaa ay sameeyaan.
- Wax u akhrisaa carruurta aadna geysaa laybareeriga (meelaha wax lagu akhristo). U keentaa carruurtaada buugag iyo majallado.
- Aad su'aallo ka waydiisaa sheekooyinka si ay u fahmaan ula jeeddada.
- La heystaa aadna bartaa jaangooyada maansada iyo gabayada.

Carruurtu waxay u baahan yihiin inay wax ka bartaan muuqa amaba qaababka, cabirrada iyo midabyada.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Siisaa carruurta waxyaabo ay ku kala soocaan muuqa amaba qaababka, cabirrada iyo midabyada.
- Ku kaalmeysaa carruurta inay tilmaamaan magacyada muuqa amaba qaababka iyo midabyada ku hareersan.

Carruurtu waxay u baahan yihiin inay bartaan tirada iyo in xisaabtu ay micno wadato.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Ku kaalmeysaa carruurta tiriska.
- U fasaxdaa carruurta inay gurigooda iyo bulshadooda wax ku tiriyaan.
- Tusisaa carruurta sida tirada loo adeegsado.



Taageeridda Qoyska , Dhaqanka iyo Luqadda

Carruurtu waxay u baahan yihiin in dugsigu uu soo dhaweeyo qoyskooda.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Surtaa guriga calaamado soo dhaweyn ah aadna isticmaashaa luqadda ay carruurta fahmayaan.
- Wax ka barataa bulshada iyo dhaqanka carruurta inta aanney dugsiga billaabin.
- U sheegtaa qoyska carruurta cidda ay u tagi lahaayeen haddii ay fikrado, su'aallo amaba ay jirto waxyaabo ay khusaynayaan.
- Ku casuntaa qoyska carruurta inay ka qayb qaataan dugsiga, fasalka iyo ururka Waalidiinta iyo Macallimiinta.

Carruurta iyo qoyskoodaba waxay doonayaan in shaqaalaha dugsiga ay ogeysiiyaan inay xushmeeyaan dhaqankooda, qaabka waxbarashada ay carruurta iyo qoyskoodaba ay u baahan yihiin.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Fahamtaa in dugsiga uu yahay halka carruurta ay ka bartaan dhaqannada iyo luqadaha tooda ka baxsan.
- Carruurta u sheegtaa haddii macallinkooda amaba shaqaalaha dugsiga ay ku hadlaan luqaddooda.
- Carruurta iyo qoyskoodaba aad ku soo dhaweysaa in dhaqanka qoyskooda ay macallinka wax uga sheegaan.
- Carruurta aad ku qortaa fasal ay dhigtaan carruur la dhaqan iyo luqad ah.
- Carruurta aad u sheegtaa in ku hadalka luqaddooda ay kordhinayso aqoonta ay u leeyihiin afkooda hooyo.



Ku dadaal Carruurta badbaadadooda iyo Caafimaadkooda

Carruurta waxay u baahan yihiin inay helaan dareemaanna badbaado.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Ku kaalmeysaa carruurta inay sheegaan magacooda, cinwaankooda iyo taleefoonkooda kuna aqoodaan luqaddooda iyo af-ingiriisigaba.
- Bartaa carruurta inay iska ilaaliyaan gawaarida iyo inay la hadlin dadka aanneey aqoonin.
- Bartaa carruurta cidda ay gargaar waydiisan karaan marka ay u baahdaan.

Carruurta waxay u baahan yihiin inay bartaan sida ay u isticmaalaan suuliga iyo xirfadaha nafsadooda anfacaya.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Bartaa carruurta sida ay dadka weyn ugu sheegaan marka ay u baahan yahay suuliga amaba ay xanuunsan yihiin.
- Ka caawisaa carruurta barashada isticmaalka suuliga, dhaqashada gacmaha, labiska iyo xirashada kabaha.
- Ku dhiirigelisaa carruurta inay keligood tijaabiyaan waxyaabaha ay barteen inta aanney kaalmo waydiisan macallinka.

Carruurtu waa inay u adeegsadaan gacmahooda iyo farahooda ku qabashada hawlaha yar yar.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Ka caawisaa carruurta sida loo qabsado, qalimmada, laabisyada, burashka wax lagu sawirro iyo maqasyada.
- Ka caawisaa carruurta inay wax ka suubiyaan bulukeetiyada ciyaalku ciyaaraan, waraaqadaha, waraaqadaha adage e wax lagu sawirro iyo sharootada galoolan.

Carruurtu waxay u baahan yihiin inay gacmahooda, lugahooda iyo jirkooda u adeegsadaan dhaqdhaqaaqyada waaweyn.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Inta ay karaan ku dhiirigelisaa carruurta oroddada, boodidda, meel fuulidda, qoob ka ciyaarka.
- Siisaa carruurta waqti ay banaannada ku dheelaan.

Waa in carruurta baahidooda aasaasiga ah loo fuliyaa inta aanneey dugsiga imaan.

Waxaad awoodi kartaa inaad:

- Hubisaa in carruurta ay wax cuneen, nasteen ayna gashteen labbis ku munaasab ah jawiga.
- La raadisaa cidda qoyska ka kaalmeyn karta waxyaabaha carruurtu u baahan yihiin ee u diyaargarowga dugsiga.



Si aan wax u barto una koro waxaan u baahnahay jidh caafimaad qaba

Waxaad:

• Ii qaadi kartaa dhakhtar ama dhakhtarka ilkaha si aan u maro baadhitaan joogto ah.

• Hubin kartaa in aan helay dhammaan tallaalada aan u baahnahay intuusan dugsigu bilaabmin ka-hor. Tallaalka dhamayska-tirani wuxuu aniga iyo kuwa kaleba naga ilaalin karaa 14 cudur oo halis ah.

• Aniga iyo qoyskaygaba naga badbaadin kartaa waxyeelada. Gargaar hel haddii uu qof adiga, aniga ama xubin-kasta oo qoyskayga ka tirsan uu waxyeelo kuu gaysanayo. Waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa: www.wcpcan.wa.gov

Si aan u helo tamar waxbarasho, waxaan u baahnahay cunto fiican, nasasho iyo cayaar.

Waxaad:

• Hubisaa in aan habeen-welba helayo nasasho igu filan xataa haddii aanan seexanayn. Haddii aan caajis iyo daal dareemayo dugsiga waxba kuma baran karo.

• Isiin kartaa cunto caafimaad ah, gaar ahaan qureecda. Sida aad khadka interneetka ugaga heshid buug ka hadlaya fikrado wanaagsan oo cuntooyinka la-xidhiidha eeg bogga ugu dambeeya.

• Codsan kartaa foomka qureecda bilaa lacagta iyo naaqiska ah iyo qadada haddii uu qoyskayagu u baahdo gargaar si cunto caafimaad ah aniga la ii siiyo.

• Hubin kartaa in aan haysto waqti iyo goob ammaan ah oo aan ku ciyaaro. carruurtu waxay u baahanyihiin ugu yaraan jimicsi maalintiiba hal-saac ah. Waxaa si aad ah iigu fiican cayaaraha guriga dibadda ka ah!

Tallaabo weyn oo dareen weyn leh

Xataa haddii aan aad u fiicnahay, waxaan u baahnahay in aad iga caawisid si aan u noqto qof diyaar ah oo hiyikacsan.

Waxaad:

• Hubin kartaa in aan labadeenuba waqti u haysanno ka fikiridda iyo ka hadlidda dareemadeena. Figradahaaga iyo dareemadaadu aniga way ihabayn karaan. Waxaan u baahnahay in aad kalsooni ii muujisid. Tani waxay qoyskeenna u tahay tallaabo weyn!

• Iga caawin kartaa sidii aan kuu macasalaamayn lahaa si aan diyaar ugu noqdo ku biiridda kooxda dugsiga waxbarashada. Xannaanada carruurtu way ka-duwantahay goobta dugsiga ka-horeeysa ama goobta carruurta lagu hayo illaa ay carruurtu ka gaadhayaan heer ay waalidku ka tagi karaan. Waxaad iga caawisaa sidii aan keligay ugula joogi lahaa macalinkayga iyo ardayda saaxiibaday ah.

• Ku farxi kartaa kaddib marka uu dugsigu ii dhamaado! Waxaad diyaar u noqotaa in aad iwaydiisisid su>aalo gaar ah oo ku-saabsan waxaannu soo qabanay iyo kuwa ay yihiin saaxeebadayda cusub.



Qoysaska iyo Dugsiyadu way iskaashadaan

Waxaan doonayaa in kuwa waa-weyn ee qoyskayga, dugsigayga iyo kuwa bulshadayda ka tirsani ay wada-shaqeeyaan.

Waxaad:

• Iwaydiin kartaa arrimo ku-saabsan fikiradayda. Waxaan jeclaan karaa in aan ogaado:
  - Illaa heerka ugu sareeya ee aan tirin karo?
  - Ma waxaan u baahnahay in aan magacayga qoro?
  - Maxay yihiin shuruucda dugsiga ka jira?
  - Saaxiibo cusub ma ku yeelan doonaa dugsiga?

• Kuwa kale kala tashan kartaa dareemadaada. Waxaad jeclaan kartaa:
  - Sida ay u fududdahay sida aad ii macasalaamayn lahayd oo aad ii fasixi lahayd si aan ugu biiro kooxda dugsiga?
  - Meeshan ma la-qabsan karaa oo si wanaagsan wax ma u baran karaa?
  - Macalinku ma arki karaa sida aan nooca gaarka ah u ahay?

• Macalimiinta weydiin kartaa fikradahooda. Waxay jeclaan karaan:
  - Sida wanaagsan ee aan wax ula qabsan karo carruurta kale ee aan kooxda kuwada jirno iyo dhawrka qof ee waa-weyn?
  - Anigu ma garanayaa sidii aan gargaar u heli lahaa marka aan u baahdo iyo sidii aan iskay ugu shaqayn lahaa marka aan sidaa u baahdo?
  - Ma soo jiidan karaa fiirada macalinka?
  - Anigu ma baranayaa sida aan tilmaamaha u raaci lahaa wada-shaqayna ula iman lahaa?



Sida la isku- diiwaan gelinayo iyo waxa la filayo

Waxaan u baahnahay in aad dugsiga ogaysiisid in aan imanayo.

Waxaad:

• Wici kartaa oo aad booqan kartaa dugsigayga sanadka ka horeeya waqtiga aan waxbarashada bilaabayo. Dugsi-kasta oo dagmo wuxuu leeyahay shuruuc u gaar ah, sidaa darteed waxaa aad muhiim u ah in iyaga lala hadlo. (Eeg bogga dambe ee buuggan si aad dugsiyada ula xidhiidhid.)

• Booqan kartaa macalinkayga oo aad una sharixi karta waxaan garanayo iyo waxa aan samayn karo.

• Waxaad ila wadaagi kartaa waxyaalaha noloshayda ka dhex dhici kara ee saamaynaya dareenkayga iyo sida aan wax u qabanayo.

• Waxaad ogaan kartaa baahiyadayda-kasta ee gaarka ah.

• Waxaad baran kartaa arrimo ku-saabsan xuquuqda uu qoyskayagu dugsiga ku dhex leeyahay.

Haddii aynu gaar ahaan ku hadalayno luuqad aan Ingiriisi ahayn,

• waxaad baran kartaa arrimo ku-saabsan dugsiga iyo adeegyada bulsheed ee aynu u baahan karno.

Waxaan u baahnahay in aad ogaatid waxa uu dugsigu naga filayo aniga iyo qoyskayga.

Waxaad:

• La kulmi kartaa macalinkayga ama macalimadayda si aad u aragtid waxa uu iga filayo ama ay iga filayso in aan ogaado ama aan karo in aan qabto. Waqtigii aad tagtay laga bilaabo illaa imika dugsigu wuu isbaddalayaa.

• Heli kartaa liiska ugu dambeeya ee tallaalkayga.

• Ogaan kartaa xogta aniga igu-saabsan ee uu dugsigaygu doonayo. Dugsigaygu wuxuu u baahan karaa koobiga shahaadada dhalashadayda, galka tallaalka ama caddaynta ciwaankayga.

• Ogaan kartaa xilliga ay macalimiintu ay ugu talagaleen la kulmidda waalidka. Haddii ayna waqtiyadaasi shaqaynayn, waxaad u sheegtaa waqtiyada shaqaynaya.

• Macalimiinta waydiin kartaa nooca gargaarka ay filayaan in aan waalidkayga guriga dhexdiisa kaga helo.

• Si mutadawacnimo ah iigu caawin kartaa dugsiga dhexdiisa.

Waalidiinta iyo Xanaaneeyayaasha sharafta mudan:

Aniga oo ku hadlaya magaca macalimiinta mustaqabalka ee ilmahaaga, waxaan doonayaa in aan kugu idhaahdo «Hanbalyo!» Waxaad durba samaynaysaa hawlo badan oo ilmahaaga ka caawinaya in uu dugsiga u diyaargaroobo. Marka aad buuggan akhrisatid waxaa laga-yaabaa in aad dareentid in aad waxyaalo badan oo muhiim ah durba qabatay. Waxaan rajaynayaa in aad dhawr fikradood oo cusbna aad ka heli doontid.

U diyaar ahaansha dugsi ee ilmuhu waa natiijada dhammaan jidhkooda, waayo-aragnimadooda bulsheed, tan niyadeed iyo tan garaadka. Tilmaamahani wuxuu kaa caawin doonaa in aad barasho dheeraad ah u yeelato sidii aad ilmahaaga guul ugu diyaarin lahayd adiga oo isku-dhafaya waayo-aragnimada barashada cusub, hawlaha lala-qabsaday iyo arrimaha sida joogtada ah loo sameeyo.

Adigu waxaad tahay baraha ugu horeeya ee ugu muhiimsan ee ilmahaaga. Ilmahaagu maalin-welba wuu kugu-tiirsanyahay, wuxuuna kaa rabaa hooy ammaan ah oo la isku-halayn karo iyo in aad u muujisid jacayl, iyo in uu muhiim yahay oo uu awood u leeyahay in uu waxbarto. Waxaannu doonaynaa in aad ogaato in marka aad dadaal adag ugu jirtid in uu ilmahaagu dugsiga diyaar u noqdo, in aan anaguna dadaal adag u samaynayno in aynu xaqiijinno in dugsiyadayadu ay qaabilidda ilmahaaga diyaar u yihiin.

Waxbarashada ilmahaagu waa mid wada-shaqayn ku xidhan. Waxaannu soo dhowaynaynaa fikiradahaaga iyo tamartaada, waxaannu sharfaynaa go>aan qadashadaada aad ku doonaysid in uu ilmahaagu gaadho heerka ugu fiican ee uu gaadhi karo. Taas ayaa sabab u ah in aynu rajayno in aad baran doontid dadka jooga dugsiga ilmahaaga, si aad isku-waydaarsataan afkaarta ilmahaaga ku-saabsan.

Guusha ilmahaagu waa shaqadayada ugu muhiimsan, markaa waxaanu filaynaa in aynu afkaarteena is-waydaarsan doono inta ay waxbarashada ilmahaagu socoto.

Si xurmo leh,

Dr. Terry Beregson
Kormeeraha Gobolka
ee Waxbarashada
Dadweynaha

Wixii Macluumaad Dheeraad ah:

Help Me Grow Oregon

Help Me Grow waxaa weeye adeeg bilaash ah oo qoyaska baahan ku xidha khayraadka iyo adeegyada laga bilaabo uurka ilaa da'da lix jir. Qoysasku waxaa sidoo kale lagu xidhaa taageerada waalidka, baahiyaha aas aasiga ah iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadka. Taleefanka: 1-833-868-4769

https://oregon.providence.org/our-services/h/help-me-grow-oregon/

Wadajirka Waalidnimada ee Degmada Washington

Qoysasku waxay baadhi karaan khayraadka wanaagsan ee ay heli karaan waalidka jooga Degmada Washington. Waxaa kamid ah waxbarashada waalidka, khayraadka daryeelka ilmaha, hawlaha asxaabta iyo qoyska, iyo khayraadka websatka ee mawduucyada waalidka ee loosoo agaasimo da'da ilmaha.

https://parentingtogehterwc.org AMA info@parentingtogetherwc.org

Waxbarashada Hore ee Degmada Washington

Waxbarashada Hore ee Degmada Washington (Early Learning Washington County, ELWC) waxaa weeye iskaashi United Way of the Columbia-Willamette iyo Adeegyada Caafimaadka iyo Bilaa Aadanka Washington. Iskaashigan gaarka ahi waxa uu isku keeney hay'ado kala duwan, waalid iyo busho si ay u taageeraan qoysaska si ay u koriyaan caruur xoogan oo caafimaad qabta.
https://earlylearningwashingtoncounty.org/

Getting School Ready!® waxaa weey dadaal gobolka oo dhan ah Thrive Washington iyo cida ay iskaashiga leeyihiin si looga taageero waalidka iyo daryeelayaasha macalinka kowaad ee caruurta. Kooxda waxaa kamid ah waalidka, khabiirada waxbarashada hore, hay'adaha bulshada, wakiilada caafimaadka shacabka iyo dugsiyada sameeyay ee waxna kusoo daray tilmaamahan. Xuquuqda sawirka waxaa iska leh Child Care Resources, Talaris Research Institute, Erin Okuno, iyo Peter Huisenga. Eighth printing